# Baro Abwaanka

## *Mujaahid* Faysal Aw Cabdi Axmed

December 15, 2008

Muunadii dalkaygoow
muxubadi qalbigoow
mugdiga aan iftiinkiyo
muuqa aan lahaynee
midabka aan lakala garan
midki noo siraadoow

maalintii agoomaha
maatadiyo dhaawaca
halyeygii mudnaayee
umiciinay ciidoow
lama moogo qalinkee
taariikh ma guurtiyo
waa mahadha joogta'ah
ana maanta guushii
mashxarad iyo salaan baan
maamuus kaaga dhigayaa

muha ubaxa doogee
mudugiyo cagaarkiyo
midabada astaantaa
muuqa ugu qurxoonbaan
faysal kugu macsuumee
mujaahidow manabad baa?

macbuud kaan baryaayaa
meertada aduunyada
murugiyo dhibaatiyo
marna eeba kuma tuso
wuxuu maanku diidoo
mawluhu ku gacan qabay

Erayadii: Busharo Ali Baando



Xili waliba tilmaan leh , gu'gii 1968[kii] dhacdooyin badan oo hor leh ayaa saameyn ku yeeshay taariikhda dhaxalgalka ah ee bulshaweynta Soomaaliyeed . Isla xiligan madaxweynihii labaad ee Somaliland waxaa loo doortay inuu ra'iisal wasaare ka noqdo dawladii la odhan jiray Soomaaliya ,sidoo kalena waxaa magaalada Hargeysa laga dhisay dugsigii sare ee ugu horeeyey oo markaa loogu yeedhi jiray "xabadi keentay ",ka dib marki ardeydii mudaharaadka sameeyey ee dartood lagu dhisay iskuulkaba uu kaga dhintay Ilaahay ha u naxariistee marxuun Maxamuud Haybe.Dugsigaasi waxaa magaciisa loo bixiyeye dugsiga sare ee Faarax Oomaar. Isla sannadkan waxay dhalashadiisu ku beegnayd Mujaahid Faysal Aw Cabdi Axmed -Faysal Cambalaash- kuna dhashay magaalada Hargeysa .

waxabarashadii hoose iyo dhexeba wuxuu ku soo qaatey dugsigii Janaraal daa'uud ,halkaa uu kii sarena ku qaatey dugsigii Maxamuud Axmed Cali iyadoo qalin jabintiisu ku beegnayd gu'gii 1984..

Xiligaa Jaamicada dalka oo garab iyo yaad taqaan inta badan ku dhisnayd waabu ka hawl yareystay una dhaqaaqay inuu iska xoogsi tago ,Xaalada dalka oo sii xumaanaysay maalinba maalinta ka danbaysa gardarada garabka ogina baalashii sii daysay saamaysayna guri kasta oo ku yaalay degaanka si toos ah ama si dadban berigaa la odhan jiray gobolada woqooyi iminkana ah wadanka Soomaliland..Ummadii waxay ku dadaashay inay wax ka qabtaan dhibtan intii karaankooga ah dhibaatadana ula dagaaamaan ilaa ugu danbayntiina ay u qalabeysteen abuurida ururkii SNM oo niyadsami ku abuuray dadkii una yeelay rajo iyogaliyeyna yidiidiilo hor leh , Faysalna bulshaduu la wadaagay tanoo dhiniciisa hawlihii looga baahnaa xiligaa ka qabtay.Waxaanu ka mid noqday halgamaagii xaq u dirirka ahaa ee SNM .Waxaa u suurto gashay inuu dagaalo badan ka qayb qaatey ilaa uu dhaawac halis ahi oo sababi gaadhay inuu aakhiro u hoydo ku dhacay hase yeeshee Ilaahay isagaa xumaan ka hufanee uu hadiisa maalin kale ka dhigay . Dhawaacaa darteed waxaa loo qaaday dhinacaa Addis Ababa ,safarkaasi wuxuu ku gabagaboobay inuu Faysal dago caro ingiriis .

Markii uu dhaawicii ka ladnaadey laakiin dad badan ay gaadhey inaanu noolayn iyagoo u arkayeyna halista dhaawacaa oo dhimasho qarka u saarneyd ayaa wiil ay saaxiibo ahaayeeen la kulmay isagooy ku noqotay amakaag iyo af kala qaadna waydiiyey Faysal siduu xaal yahay ileyn dhimashuu dhiniciisa uga tirsanaayee ,hase yeeshee Faysal oo dhinaca maansooyinku aanay u bilaabmeynba ayaa arintan ku soo boodada ahi ku kaliftay inuu afarley ugu warceliyo kuna yidhi:

Haddaan caawaba ka noolahay

caleentaydaan cadaanoon

inaan dib u ciidanshaa

cirdhiga shaw iiggu tiilay

Faysal oon maansooyinka inuu dhageysto mooyee wax ku darsan jirin halkiisii ayuu ka sii

miisay  kuna ekaaday in muddo ah ilaa iyo mar uu habeenimo shaqayn jiray oo isaga iyo inadadii ay wada shaqeynayeen si xifaaltan ah iskugu tuurtuuren giraanka hageysa maansooyinka aan dhageysanayno malaha waynu ka tirin  wanaagsanaan laheyn hadeynu isku dayno ..hadalkii ayaa la sii waday kuna gabagaboobay in uu faysal maalintii danbe la shir yimaado maanso dhan oo ka dib markay saaxiibadii dhageysteen ay aad ugu riyaaqeen una qireen guul aan la tilmaamin karin ,siisayna Faysal inuu awood u leeyahay isku gaynta erayada iyo u adeegsigooda hab maanseed waxaanu u sahay qaatey kobcinta Ruwaayad dhameytiran oo uu ilaa iyo hadda hayo gabagabeeyeyna xiligaa si fiicana uga turjumaysay  waayihii markaa ka taagnaa caro ingiriis siiba dhalinyarada labka ah ee u guur tagaya dhulkii hooyo iyo dhalinyarada dhediga ah ee talo ula gudboonaatey inay shisheeyaha u dhaxaan iyo in kale.

Ruwaayadaasi may suurtogalin in la soo bandhigo iyadoo fanaaniinta cusubina inay wax looga horeeyey qaadaan talo ka noqotay kuwii horena ay kala baaheen ..

Maalmihii  uu dhacay dagaalki balaadhnaa ee Ciidan kii SNM ku soo gudo galeen badiba dalka bishii shanaad ee sanadkii 1988[kii] ayaa wuxuu Faysal si toosa ugu biiray ciidamadii ka dagaalamayay magaalada Hargeysa ,markiibana  wuxuu ka qayb qaatey laba dagaal oo ka dhacay bacadlaha magaalada Hargeysa iyo mid ka dhacay xeradii la odhan jiray Kabista hubka oolay labadaba ciidamidii SNM wacdaro ka muujiyeen hurgufeena ciidamdii waxay u dagaalamayaan aan garaneyn ee koonfur laga soo daad gureeyey .

Intaa ka dib waxa la raaciyay ciidan loo qaaday dusha magaalada Cadaroosh, halkaas oo uu ka bilaabmay tababar lagu baranaayay sida loo isticmaalo qoryaha waawayn ee uu ka mid ka yahay Jiibka iyo hoobiyaha .Waxa kale oo meesha lagu baranaayay qoryo badan oo sida suuga tasataha ( Soddon iyo lix miter) iyo qaar kale.Halkaas oo uu ka mid noqday ciidankii ugu horeeyay ee lagu furay tababarka isagoo da’dii dhalinyarnimo madaxa la galay, aadna wuu u xiisaynayay maskax furanaan darted  ayuu markiibana  la qabsaday hawlihii tababarka kartina u yeeshay inuu isticmaali karo  waxaa loo tababaray.

Waxa tababarkaasi socday muddo lix bilood ah oo uu Faysal si dhamaystiran u bartay qoryaha dhamaan sidii loogu dagaal gali lahaa ka dib markii la xidhay intii ay isku marka bilaabeen ,waxaa la go’aansadey in hawlgaliyo oo loo qaaday in la dagaal geeyo.

Xiligan waxaa Faysal maamulihii xerada tababarka ee Cadaroosh –Axmed Gadhyogolka codsaday maadaama ay tababarayaashii qaarkood go’aansadeen  inay dagaalka tagaan in uu la joogo kana mid noqdo tababarayaasha inta hadhey,kana mid noqdo  maamulkii xerada oo uu sii joogay saddex bilood oo dambe .

Bishii saddexaad ee sanadkii 1989[kii] ayaa waxa la sheegay in ciidan xoog leh oo faqash ah ay dageen meesha loo yaqaan Maqaaxida Inanta ee galbeedka magaalada Hargeysa ku taalla oo ahayd halka ay ciidanka SNM ee u socdaa hoos ama woqooyiga magaalada Hargeysa ay ka talaabaan waxaanay kaloo ahayd xiliyadii laga soo bixi doono magaalada Hargeysa ee ciidankii dhamaan toos isu soo diyaariyeen inay dusha u soo guuraan intii badnaydna sooba baxeen .

Goor habeena ayaa waxa cidamdii uu faysal ku jiray u yimid rag dhawra oo uu wataγ Ibraahim dhegawayne una sheegay in ciidamo dhaawac ah  loo baahan yahay in la soo

talaabiyo ay u xayiran yihiin faqashtaas degtay Maqaaxida Inanta awgeed loona baahan yahay in la jiidhsiiyo si dhaawacu u soo nabad talaabo.

Waxa halkii xeradda laga hubeeyey rag ilaa 120 ah oo col moog ah iyo 40 waayo arag ah oo lagu dhex qasay habeenkii waxaanu gudoodi ku mareen inta u dhexaysa gadhka Malawle iyo Cadaroosh salaadii horena waxa lagu waa bariistay ciidankii oo aanay kuba qaadan wax ka badan 5-7 daqiiqo oo ay meeshii kula wareegeen markiibana la soo dhaafiyey dhaawacii .Rag isku damqanaya iskuna dhimanaya isna daryeelaya ayey ahaayeen oojidhku iskugu yaal waxaaa midaynaysay ujeedo qudha  oo ah jiilka danbe xornimo ha ku  noolaadaan.Dhacdooyinka noocan ah ka sheekayntoodu waxay muujinaysaa  in inaan dhib lagu helin gobanimada iyo xornimada manta Somaliland haysato .

Waxay ahayd guul aad u wayn in aan nin dhaawacmay oo la odhanaayay Ismaciil mooyee cidi aanay halkaa ku  dhiman waliba waxay ciidamadaas uu Faysal ku jiray  sii joogeen halkaa ilaa barqadii oo ay hubsanayeen in raacdo iyo gurmad toona ciidamadii faqashtu la soo noqoto .
Ka dib maalintaas wuxuu Faysal ku soo laabtay lafta Fara-wayne oo uu halkaa sii joogay mudo bil ku dhawaad ah .Waxaana halkaa yimi Tahar Xirsi Taawilo –Tahar dhegoole iyo ciidan ka yimi ciidanka  Sancaani.Markaa Muuse Biixi oo halkaa joogay ayaa wuxuu kula taliyay Faysal inuu raaco ciidankan oo aan u noqdo ride jiib waayo dagaalo ka dhacay Habaas wayn ayaa waxa la sheegay inay waayeen ride jiib oo ay kaarayaashii dhibi ka haysato.

Wuxuu Faysal  maalitaa soo raacay gaadhigii Tahar watay oo uu ku soo biiray ciidanka Sancaani (guutadii 10naad) dagaalo laba ahna wuu kala qayb qaatay bishii afraad ee isla sanadkaa 1989$^{kii}$ oo ka dhacay Garabis iyo Habaas ayna soo weerartay faqashtu oo ayaamo ka dib waxa la sheegay in loo baahan yahay ciidan xoojin ah oo ka qayb gala dagaal ka dhici doona Cadaadlay maalintaasi oo ahayd 27kii bishii shanaad ee 89$^{kii.}$ Waxaan ahaayeen ciidan badan waxaana meesha joogay Xuseen Dheere, Haybe Laambad iyo Ibraahim Dhego wayne oo ahaa madaxda nala socotay. Waxaana  maalintaas loogu doortay iyadooy ahayd sannad guuradii koowaad ee  markii SNM soo gashay gudaha dalka maalintii 1988$^{kii}$ sidaasaana Cadaadlay lagu galay.

Waxa halkaa ka dhacay maalintaas habqan badan oo ciidan kii ayaa kala midhiiqiyay waxaana jiibkii uu Faysal ridaha ka ahaa ku go’day xabad oo isna wuu ka xayrimay waxa kale oo la tilmaami karaa oo halkaa  dhacay dhabar jabin laxaad leh .

Habeenkii banka u dhexeeya Weeraarta iyo Gadhka Warsame Xaad waxay ka galeen dagaal ba’an oo na dhex maray gurmadkii iyo hadhaagii subaxii lagu  weeraray Cadaadlay oo isa soo urursaday nasiib wanaag cidina kama  dhiman ,waxaana  guul ahaan hantidodii ku soo biiray hal gaadhi oo xaajiyad ah ayna kala hadheen ciidankii firxadey.

Mudo ka dib waxay ciidamadan uu Faysal ku jiray u guureen meel u dhexaysa Xaraf iyo Dhaboolaq oo ujeedadu ahayd in xidhiidh ka dhex socday Axmed Cumar Jees(oo ahaa taliyihii ciidamadii  halkaa ) iyo madaxdii SNM la soo afjaro ,inkastoo aanu Faysal xasuusnayn bishii ay aheyd wuxuuse qiyaas ahaan ku tilmaamay inay  u dhexaysay bishii lixaad ilaa tii laba iyo tobnaad .

Halkaas waxa ku soo baxay ciidan xogaa ah oo aan wadan gawaadhi hubaysan ee wata gawaadhi yaryar oo xarago iyo hal gaadhi oo xamuul ah noocii loo yaqaanay "Fuqaa i bararay-Bagase" ciidanka la socdayna kama badnayn 60 qof hadaanay kaba yarayn .

Muddo dheer ayaan wax dagaal ah la qaadin oo la iska fadhiyay ilaa laga gaadhayay dhamaadkii sanadkaas 1989[kii] oo ay xidhiidh dheeraa oo ka dhexeeyay SNM iyo Hawiyihii magaalada Hargeysa joogay oo soo gabgaboobay kuna soo afjarmay in lagu gacan siiyo sidii ay uga soo bixi lahaayeen magaalada Hargeysa .

Waxay taariikhdu ku beegnayd 05/12/89 goor barqo ah ayaa waxaa u yimid ciidamadii uu Faysal ka mid ahaa Dayib guray (Ilaahay ha u naxariistee),Muuse Biixi iyo Cabdilaahi Darawal oo wada socda hal gaadhina wada wata waxaanay isugu yeedheen dhamaan ciidankii Sancaani oo dhan una khudbadeeyen kuna qanciyeen isla maalintiibana waanu u dhaqaaqeen dhinaca Buurta Gantaalaha ee u dhaw 1[da] July ama halka iminka ay tahay Jaamicada Hargeysa.

Markii ay gaadheen Buurta gantaalaha ee uu saarnaan jiray hubkii waawaynaa ee Saamku ka mid ahaa waxay kula kulmeen ciidan aad u badan oo difaac ku jira waxa markiiba loo kuur galay in la ogaado cidda ay difaaca kaga jiraan , halka ay joogaan iyo inta u dhexaysa labada ciidan, isla markiibana way daadageen ilaa xaafadda Siinaay ooy gaadheen.Halkaana waxay kula kulmeen dad badan oo shiciba iyo rag ka tirsanaa ciidankii hardaaaha loo laabay waana la soo qabqabtay .

Markay saacaddu maraysay abaara saddexdii ilaa saddexdii badhkii waxaa ku bilaabmay weerar kaga yimid dhinaca xeradda Birjeex eeqaybtii 26[aad] oo ay dib ugu soo jeedsadeen. Haddii jilibka ay u dhigeen oo ay gawda iska saareen, waxaa mudo ka dib suurtogashay in ay caabiyaan wareerkii oo ay ku celiyaan xerada Birjeex.Markay arini halkaa marayso ayaa halkii loo yaqaanay xabaalaha milatariga oo lahayd jeexjeex ciidanka badankooduna aanu ka war hayn ayey ciidamadii faqashtu u gashay jeexjeexaas oo ay halkaa kaga dhinteen rag dhawra oo uu ka mid ahaa talihii ciidanka watay Maxamed Tukhni-Ilaahay ha u naxariistee- iyo nin ay Faysal saaxiibtinimo dheeraadi ka dhaxeysay waana Saleebaan yare oo isna ride ka ahaa qoriga "barawnka" aha ,Faysal laftigiisa waxaa halkaa ka soo gaadhay dhaawac halis ah , nasiib wanaagse ka dhicin gaadhiga oo suurtogalin kari laheyd inuu qudhiisa ku waayo.Maalintii waxaa batay habqanku ,waxayna ahayd maalin si khalada loo guda galay ciidanka faqashta iyadoon sahan fiican ka horayn iyo tirade ciidan meesha galay oo yaraa .Dhacdadani waxay noqotay filnawaa waxaanay dardar galisay ciidamadii SNM-ta oo feejignaan badan sameeyey wixii tan ka danbeeyey .

Faysal wuxuu ka maqnaa ciidanka muddo ka badan sideed bilood dhaawaca dartii iyo baxnaanis raadis awgeed ,isagoo markii uu dhaawacii ka bogsaday tagay magaalada Diridhaba ee cariga Itoobiya oo uu soo joogay ilaa saddex bilood oo ka mid ah sideeda bilood. Markii uu Faysal ku soo noqday halgankii ,wuxuu la kulmay weerar laxaad lahaa oo ay faqash ku soo qaaday dhul badan oo ilaa xadkna ay soo gaadheen.Maalintaas ay weeradu bilaabmeen ciidamadii faqashtu , Cidamada SNM-tu waxay u sii socdeen meel la yidhaa Bali axmed ka dibna uga sii xamaan guranayeen in ay weerar magaalada Berbera ku qaadaan,sidoo kale faqashtiina waxay weerartay magaalada Bali Gubadle .

Is waydaaradkaasi wuxuu keenay in ay ciidamadii SNM-tu  dib u soo gudaan habeenkii subaxiina Bali Gubadle ku weeraraan kana saaraan,.Waxay ku guulaysteen inay u bixiyaan ilaa Banka oo sidaas ayay ku tagtay faqash .Waxyaalaha guulahan  badan keenayey waxa ka mid ahaa ciidamada SNM-tu oo dhuka si fiican u garaneyey dadka degaankana garab fiican ka helayey , halka ciidamada faqashtu  ay u badnaayeey ciidamo degaanku ka soo horjeedo niyadjab badana haystay.

Ciidankii SNM-tu wuxuu u xidhxidhay in la weeraro magaalada Berbera oo guutadii Koodbuur ay markiiba galeenn halka Sancaani iyo Barkhad ay ku hakadeen Dhubato oo laga hor fadhiisto wax kastoo gurmad ah kana yimaada dhinaca magaalada Hargeysa Sidoo kale ay Sayid Cumarna  fadhiyeen Arabsiyo oo si ay u xidhaan wixii ciidan gurmad ah ee uga iman kara dhinaca galbeed .

Waxa halkaa ka dhacay dagaalo  muddo shan cisho ah iyadoo sagaal dagaal oo aad u waawaynaa ka ugu yarina soconaayay 15 daqiiqo, halka ay qaar soconayeen laba saacadood in kasta oo aanay u soconayn si joogta ah. Halkaas waxay ciidankii SNM-tu ku guulaysteen inay jabiyaan,waxaanay kala hadheen saanad badan .Waxaa iyana si aad iyo aad u wayn u caawiyay ciidanka miinada oo qabtay shaqo aad u wayn .

Kadib waxaa loo baqoolay dhinaca galbeed oo aan ciidanba ku hadhin ee iska banaanayd waxaanay si toosa u galeen magaalada Boorama oo dagaal aan sidaas u waynayni uu ka helay in kasta oo uu Dila ka sii bilaabmay kuna dhamaaday Boorama .Hadana muu waynayn oo halkaa waxa ku dhintay laba qof ooy gabadhi ka mid aheyd lana odhan jiray Sabaad cabdi xood (Ilaahay ha u naxariistee) .

Isla todobaadkaa waxay u dhaqaaqeen dhinaca Saylac oo ay ka wareegeeb Illimaha Bari ta ugu bariyaysa ilaa ay ka gaadheen Lughaya.Cid may is arag waxaanay iska heleen ciidankii ugu badnaa meesha la yidhaa Ceel Gaal oo ku taala banka Giriyaad halkaas oo uu dagaal culusi kala kulmay waxba kamay dhiman dhaawacuna ma badnayn mana cuslayn halkaana waxaa saadkii ciidamada ku soo biiray hal kaare iyo saddex gaadhi .

Muddo yar ayey ku qaadatey inay gaadhaan Lawyacado oo ay joogeen hal todobaad ku dhowaaad .Bishii afraad ee sanadkii 1991kii ayy Faysal u kacay dhinaca Jabuuti ,mudo ka dibna ku soo laabtay ciidanka .Markuu bil joogay waxa markiiba loo sheegay inuu ku jiro ciidan loo bedelaayo dhinaca magaalada Hargeysa uuna dib uu soo laabatay Hargeysa.

Waxa iska adkayd nolosha ciidanka oo  halgankiina wuu dhamaaday , sidaa darted Faysal wuxuu goostay inuu ka dhex baxo iskana shaqaysto ,waxaana u suurto galay inuu dhismahii ka qayb galo nolol maalmeedkiisana  la soo baxo isla sanadkaas wuxuu guursaday Xaaskiisa ay ilaa iminka wada joogaan  oo meherkoodu dhacay  23/09/1991 kuna aqal galeen magaalada Hargeysa.ae yeeshee waxaa markiiba u suurto gashay nasiibna u heleen inay labadayaduba u soo dhoofaan caro Ingiriis oo uu ilaa hadda ku nool yihiin ,waxaanu leeyihiin saddex wiil .

Markiiba Faysal wuxuu isku dayay inuu barto afka wadanka oo ku qaatey muddo yar  inuu barto in ku filan una suurtogalinaysay inuu shaqo tago. Wuxuu  bilaabay inuu dhanna ka shaqaysto

dhana wax barasho ka korodhsado oo uu dhinac uun dadka ka raaco noloshu wayku adkaatay intii hore ilaa idhaahdo saddexdii sano ee u horeeyay wuxuuse si dhab ah ula qabsaday laga soo bilaabo sanadkii 1995$^{kii}$ oo kolay xasuuso badan ku leh noloshiisa.

Faysal aad ayuu ugu dadaalaal mar kasta halgankii uu galay inaanu ka hadhin  waxaanu ka mid yahay dhaqdhaqaaqyada reer Somaliland ee aan ka daalin arimaha kor loogu qaado qadiyadda Somalilandnimada kol ay ahaato  xaflad , banaan bax ,shirarka lala galo shisheeyaha iyo haday wacyi galin tahayba .Waxaanu iminka yahay guddoomiyaha urur jaaliyada galbeedka London (west London Somaliland Community) waxa kale oo uu ka mid yahay uruka Somaliland forum,waxaa kaluu ka mid yahay  ururka Somaliland society Europe ,isagoo gudoomiyana ka ah ururka abwaanada soo kacaya ee Somaliland.

Dhinacan maansooyinka oo  aad loogu yaqaano Faysal ayaa waxaa u suurto gashay inuu maansooyin badan oo dhinacyo badan taabanay  hogaanka u qabtay kuna sargooyey qaab farshaxanaysan .Bahda maeegta farshaxan waxay ku soo bandhigtay maansooyinka Faysal ardaaga loo suntay Gabayaaga da'yar .Ilaa in ka badan tobaneeyo maanso ayuu Faysal ilaa iminka  soo bandhigay .

Faysal waa abwaan da'yar waqti fiicana siiyeye inuu ururiyo  abwaanada la jiilka ah isagoo ah gudoomiyaha  abwaanadan .Wuxuu  ururiyaa maansooyinka ay tiriyaan  abwaanadan soo kacayaa qayb wayna ka qaataa inuu silsiladaha kala duwan ee mareegaha  ku xardhan waa madaale u hawlan una heegan ah  kobcinta afkeena ,xiligii halgankana qaatey qaybtiisaa gutayna xilkii loo igman lahaa .Bahda mareegta farshaxan  way ku hanweyn tahay inay taariikh nololeedkiisa iyo hab maanseedka  dhagaha soo jiidanaya soo bandhigto .

Tifatire:
Fu,aad Sh.Abuubakar
Bahda Mareegta Farshaxan
www.farshaxan.com

Mahadnaq:
Bahda mareegta farshaxan waxay u mahadnaqeysaa Mujaahid Faysal oo si  wanaagsan noola shaqeeyey mudadii hawsha qoraalkan lagu  guda jiray.